



Cabot Primary School



Sibtember 2020

Gacaliyayaal Waalidiin iyo Daryeelayaal,

Waan ku farxsannahay inaan mar labaad warqad kuu soo qorno taasoo tibaaxeysa qorshaha is-barashada ee canuggaada iyo kala-guurka uu ku tegaayo fasalka Risabshanka.

Waxaan ognahay xaaladda cudurka safmareenka ee hadda taagan in ay tahay mid aan deggeneyn, waxaanna dooneynaa inaan kuu xaqiijino inaan sameyn doonno wax walboo awooddeenna ah si aan kala-guurka ku saabsan billaabidda dugsiga ay u noqoto mid deggen. Carruurta caafimaadkooda, badbaadadooda iyo same-ku-nagaanshahooda waxay mar walba ahaan doontaa mudnaanteenna koowaad waxaanna raaci doonaa hagidda dowladda. Carruur badan ayaa guriga la joogay waalidiinta bilooyin badan, marka billaabidda Dugsiga Hoose ee Cabot waxaa laga yaabaa in canugga iyo adigaba ay ku noqoto mid adag. Tan darteed, kulannadeenna is-barashada waxay ka dhici doonaan barxadda bannaanka taasoo ay wehlin doonto waqti kala-guur fudud ee bisha Sibtember. Fadlan fiiri shaxda qorshaha ee websaydka dugsiga haddii aad rabtid akhbaar dheeri ah. Fadlan ogoow haddii canuggaada ay dhib ku noqoto waqtiga kala-guurka waan u dabcin doonaa habkaas, annagoo u sameyneyna qorshe u gaar ah. Qorshooyinkaas waa kuwo ku-meel-gaar ah waxaanna ku lammaanan isbeddel marka la fiiriyo xaaladda bulsho ee hadda taagan, laakiin waa lagula soo socodsiin doonaa haddii wax is-beddel ah uu yimaado.

Kulannada is-barashada ee dibadda, waxaan codsaneynaa in hal waalid oo keli ah uu canugga soo raaco. Kulannada is-barashada waa fursad aad kula kulmeyso shaqaalaha dugsiga, aadna ku dhameystireysid buuxinta waraaqadaha loo baahan yahay aadna wixii su'aad ah ee aad qabtid ku weydiin kartid. Waxaan u baahannahay National Insurance number-kaada si aan u buuxinno waraaqaha arrintaas la xiriira, marka fadlan horay u soo qaado marka aad kulanka imaaneysid. Inta lagu jiro iyo ka dib kulan walba waxaan ixtiraameynaa kala-fogaanshaha iyo nadiifinta.

Kulannada kala-guurka, waxaa lagaa codsan doonaa inaad canuggaada keentid aadna ka kaxeysatid albaabka dugsiga waqtiga lagu cayimay. Kooxdeenna wanaagsan ayaa canuggaada u kaxeynaaya fasalka hubinaayana in ay la qabsadaan, saaxiibbo sameystaan ayna bartaan fasalkooda cusub. Hadda, fadlan la wadaag shekooyinka bulshada ee coronavirus ee aan la sameeyey canuggaada siina wad inaad kala shaqeysid nuqulkii soo dhaweynta ee lagu siiyey.

Waxaa lagu soo diri doonaa dhambaal taleefan kuu sheegaayo kulankaada is-barasho waqtigooda iyo taariikhdooda iyo websaydka dugsigeenna si aad ula socotid akhbaarta kore.

Waxaan fahamsannahay inaad weli qabtid su'aalo dhowr ah waxaanna kaa ballan qaadeynaa inaan isku dayno inaan ka jawaabno su'aalo badan inta lagu jiro kulanka is-barashada. Haddii aad qabtid su'aal degdeg ah, fadlan u soo dir e-mail xafiiskeenna cabot.p@bristol-schools.uk waan kaaga soo jawaabi doonaa sida ugu dhaqsaha badan ee aan awoodno.

Waxaan dhawreynaa inaan kuugu soo dhaweyno adiga iyo canuggaada dugsiga maalinta kulanka is-barashada.

Salaamo naxariis leh iyo rajooyin wanaagsan,

Learn together, respect each other, achieve forever

Headteacher Tom Burton Halston Drive, St Pauls, Bristol, Bristol BS2 9JE

Tel: 0117 3772630 Email: Cabot.p@bristol-schools.uk Web: www.cabot.bristol.sch.uk





Cabot Primary School

Mrs Carter
Macallinka Fasalka Risabshanka
Madaxa Waxbarashada Hore ee Aas-aasiga



Learn together, respect each other, achieve forever

Headteacher Tom Burton Halston Drive, St Pauls, Bristol, Bristol BS2 9JE

Tel: 0117 3772630 Email: Cabot.p@bristol-schools.uk Web: www.cabot.bristol.sch.uk

